

## Bayaanka Saamaynta Saamiga ee Codsiyada iyo Soo-jeedinta Gudiga Dugsiga

**Cinwaanka:** Waxbarista Akhriska-qorista Hore ee Kuhaboon K-2aad

**Taariikhda:** 2/24/20

**Miyaa QALABKA QORSHEYNTA SINADA BPS la isticmaalay? (Haa ama Maya):**

In kasta oo REPT aan si rasmi ah loo adeegsan, sinnaanta jinsiyadu waxay ahayd dhiirrigelinta mashruuca muraayaddaasna waxaa lagu dabaqay qorshaynta oo dhan. Soo Koobida REPT-ga ayaa kuxiran.

Qaybaha Qalabka Qorshaynta Saamiga Jinsiga BPS	Soo Koobida/Sabab
<p><b>1. Soo jeedin / Soo bandhigid &amp; Saamaynta</b> <i>Waa maxay natiijooyinka iyo saameynta codsiyada/soo-jeedinta la rabo? Ayaa hogaamiyay hawshan, miyayna ka tarjumayaan kaladuwanaanta ardayda / qoysaska BPS?</i></p>	<p>Waxbarista Hore Akhriska-qorista ee Sinnaanta K-2aad waxay ku lug leedahay manhaj cusub oo manhaj iyo qiimeyn, iyo sidoo kale barasho xirfadeed iyo tababaro oo loogu talagalay dugsiyada hirgelinta qalabkan oo ay weheliso dhaqamada waxbarida ee ka soo horjeedda cunsuriyadda. Iyada oo qayb ka ah mashruucan waxaan u wareejineynaa habka waxbarista aqrinta ee degmada. Isbeddelkani wuxuu ku saleysan yahay sannado cilmi baaris ah oo ku saabsan cilmiga garashada.</p> <p>Natiijadayada loogu talagalay waa carruurta ku jirta BPS, gaar ahaan Madoow, Latinx, Bartayaasha Ingiriisiga iyo carruurta leh xuquuq gaar ah, waxay ka tegayaan kulanka fasalka 2aad ama ka badan rajooyinka laga qabo akhriska, qorista, iyo hadalka, sidaasna waxay ku abuureysaa xaalado ay ardayda ku yimaadaan fasalka 3 oo diyaar u ah iskuulka ku baraaraan. Natiijada kale ee la damacsan yahay waa in la dhiso awoodda barayaashayada si ay u gaarsiiyaan dhammaan barayaasha akhriska waxbarista tayada sare leh.</p> <p>Shaqadu waxay ujeedadeedu tahay in la xiro farqiga u dhexeeya fursadaha sida lagu cabiray natiijooyinka qiimeynta Akhriska-qorista Hore ee ardayda BPS' ugu da'da yar iyadoo la waafajinayo qalabka K-2 Dirrada iyo Xirfadaha Aasaasiga ah iyo ballaarinta barashada xirfadeed iyo tababarka.</p>
<p><b>2. La jaanqaadida Qorshaha Istiraatiijiyadeed</b> <i>Sidee soo jeedinta/bandhigu ula jaanqaadayaan qorshaha istiraatiijiyadeed ee degmada?</i></p>	<p>Shaqadani waxay si cad ula jaanqaadaysaa qorshaha istiraatiijiga ah ee BPS' oo ay ku jiraan 2.2, 2.4, 2.5 &amp; 2.8 oo loogu talagalay barashada la bartilmaameedsaday, 3.7 ee ku lug lahaanshaha qoysaska, iyo 6.2 &amp; 6.5 ee iskaashiga. Waxay sidoo kale la jaanqaadaysaa Waaxda BPS qorshaheeda istiraatiijiyadeed.</p>
<p><b>3. Falanqaynta Xogta</b> <i>Xog intee le'eg ayaad u adeegsatay inaad ku falanqeyso arrinta/mowduuca? Miyaa lagu kala saaray jinsi? Maxay muujisay marka loo eego kala duwanaanshaha dadka taariikhda la haybsooco ah?</i></p>	<p>Waxaan adeegsanay seddex ilo: MAP xogta akhriska-qorista hore, xogta MCAS, iyo xogta mudada dheer ee baareysa K0 ilaa 2aad horumarka ardayga. Xogta waxaa loo kala saaraa jinsiyadaha ardayda, daqliga, luqadda, heerka waxbarashada gaarka ah, iyo xaafadahooda. Madow (31%) iyo Latinx (27%) ardayda ayaa si aad ah uga hooseeya rajada Aqriska Afka marka loo eego Caddaanka (58%) iyo Aasiya (57%) Ardayda. Kala duwanaansho la mid ah ayaa</p>

	ka jira dakhliga qoyska, iyo ardayda naafada ah (18%).
<p>4. <b>Kaqeybgalka Daneeyayaasha</b>  <i>Yaa ku hawlanaa (tirada, dadka, iyo doorarka), sidee iyo maxay ku dhalatay? Maxay ardayda / qoysaska saamaynta ugu badan ku yeesheen codsiga/ soo bandhigistu tidhi?</i></p>	<p>Macallimiinta, maamulayaasha, agaasimayaasha bulshada/macallimiinta, qoysaska, iyo shaqaalaha xafiiska dhexe (sida Xafiisyada Waxbarashada Gaarka ah, Bartayaasha Ingiriisiga, iyo Tacliinta iyo Barashada Xirfadaha) ayaa gacan ka geystey qaabeynta iyo hirgelinta manhajka Diirada, oo ah qayb muhiim ah ee Khariirada Wadada Hore ee Akhriska-qorista. Xogta ayaa sidoo kale hageysa shaqadeena maadaama ardaydu ay si aad ah uga sii fiicnaanayaan horumarinta ereyada (muhiimna u ah horumarinta fikirka) marka loo eego wacyiga dhawaaqa iyo aqoonsiga ereyga.</p>
<p>5. <b>Xeeladaha Saamiga Jinsiyada</b>  <i>Sidee soo-jeedintan/bandhiggu u yareeyaa kala-duwanaanta una kordhiyaa sinnaanta, gaar ahaan sinnaanta sinjiga? Waa maxay cawaaqibta aan la filayn? Istaraatiijiyad dheeri ah ayaa sii horumarin doonta saamiga?</i></p>	<p>Shaqadani waxay udub dhexaad u tahay yareynta kala duwanaanshaha jinsiyada iyo kuwa kale. Xogta waxay si gaar ah u tilmaamaysaa aagagga baahiyaha la xiriira wacyigalinta codadka iyo akhriska afka, istiraatiijiyaddana waxaa loogu talagalay in lagu hagaajiyo natiijooyinkaan loogu talagalay ardayda Madow, Latinx, Ingiriisiga iyo ardayda naafada ah. Tababbarka iyo barashada xirfadeed waxay xoojin doontaa aqoonta macallimiinta, waxayna ka caawinaysaa inay hirgeliyaan xeelado cusub. Manhajka Diirada ayaa dib loo eegay si loogu daro diiradda degmada ee dhaqamada lagu adkeeyo dhaqanka iyo waxyaabaha muhiimka u ah.</p>
<p>6. <b>Miisaaniyadda &amp; Hirgelinta</b>  <i>Waa maxay saameynaha miisaaniyadu? Sidee fulintu u xaqiijin doontaa ujeedooyinka sinnaanta in la waafaqay? Ma jiraan hoggaan iyo shaqaale Madoow, Latinx ah oo keena muraayad sinnaanta sinjiga?</i></p>	<p>Waxaan qiyaaseynaa in dadaalkan uu ku kici doono \$7 milyan muddo afar sano ah. Kharashaadka waxaa loogu talagalay agabka manhajka, buugaagta maktabadaha dugsiga, barashada xirfadaha iyo tababarka, iyo takhasusyada akhriska. Jagooyinkan waxaa loo baahan yahay si loo hubiyo in manhajku daacad u yahay, iyo in si wanaagsan loo taageero ardayda sii wada halganka aqriska iyo qoritanka (Tier 2). Waaxda BPS ee Carruurnimada Hore waxay shaqaalayn doonaan shaqaale matala ardayda aan u adeegno.</p>
<p>7. <b>La Xisaabtanka &amp; Isgaarsiinta</b>  <i>La Xisaabtanka &amp; Isgaarsiinta Sidee saamayn loogu samayn doonaa qiimeynta, diiwaangelinta iyo la socodsiiinta daneeyayaasha? Ayaa masuul ka noqon doona tan?</i></p>	<p>Waaxda Carruurnimada Hore waxay cabbiri doontaa horumarka sannadlaha ah, waxay sameyn doontaa sixitaanno koorso joogto ah, waxayna la shaqeyn doontaa shaqaalaha dugsiga iyo kuwa Xafiiska Dhexe si loo hirgeliyo isbeddel. Warbixinno sanadle ah ayaa la siin doonaa Guddiga Dugsiga.</p>